



Marka iskuulka la xiro, Summer EBT ayey Qoysasku Heli Doonaan!

(When School's Out, Summer EBT is Here to Help!)

Summer EBT (Electronic Benefit Transfer) (Manaafacaadka Kaarka Lagu Soo Shubo) waxaa qoysaska lagu siin karaa heerka dakhligooda si ay ilmahooda cunto ugu soo iibsadaan inta uu iskuulku ka xiran yahay xilliga kuleylaha. Wisconsin waxay ilma kasta kaarka ugu soo shubeysaa \$120 markay xaq ugu yeeshaan. Manaafacaadka waxaa lagu isticmaali kartaa meel kasta oo aqbaleysa FoodShare, sida dukaamada cuntada badankooda, dukaamada kale, iyo suuqyada beeraleyda qaarkood.

Si toos ah ayaa ilmaha loogu soo dirayaa manaafacaadka:

- Haddii ilmaha loo oggol yahay cunto ah bilaash ama qiimajaban in uu ka helo National School Lunch Program (Barnaamijka Cuntada Iskuullada ee Dalkoo Dhan).
- Haddii aad iskuulka ilmahaaga siisay foom kale oo ah dakhliga qoyska oo muujinaya in aad soo buuxisay shuruudihii dakhliga ee Summer EBT.
- Haddii ilmahaagu gaareen da'dii iskuulka oo ay qoyskaagu ku jiraan FoodShare, W-2, Food Distribution Program (Barnaamijka Qeybinta Cuntada) ee Seeraha Hindida, ama income-based Medicaid program (barnaamijka Medicaid ee ku saleysan dakhliga); ama haddii la ogyahay in ay yihiin soogalooti, ilma sharcigu ku meeleeeyey qoysaska ilmaha korsada, ama haddii ay hayso hoy la'aan.



La soco waraaqahaaga boostada dabayaaqada bisha Juun! Haddii qoysku xaq u yeeshaan, waxaa la soo dirayaa waraaqda manaafacaadka ilmaha.



Helitaanka Summer EBT saameyn **kuma** yeelanayo haysashada sharciga lagu joogo dalkan ee ilmaha ama qoyska.



WISCONSIN DEPARTMENT
of HEALTH SERVICES

Waxaan u mahadcelineynaa Shaqaalaha Department of Public Instruction's School Nutrition (Nafaqada Iskuullada ee Waaxda Waxbarashada Dadweynaha) ee Wisconsin oo iyagu hagaya barnaamijka iskuullada ee Summer EBT.



P-03603SO (04/2024)

Maxaa dhacaya haddii ay ilmahaaygu xaq u yeeshaan manaafacaadka laakiin aysan qoyskaygu ku jirin mid ka mid ah barnaamijyada ku qoran waraaqaha?

- Haddii iskuulka ilmahaagu ku jiro National School Lunch Program (Barnaamijka Cuntada Iskuullada ee Dalkoo Dhan), iskuulka ayaad ka codsan kartaa Free or Reduced Price Lunch (Cunto ah Bilaash ama Qiimajaban ama FRPL). Haddii la soo oggolaado codsiga ilmahaaga, waxaad heli doontaa Summer EBT.
- Haddii aad codsataan mid ka mid ah manaafacaadyada gobolka ee ku qoran bogga hore oo la idiinku soo oggolaato ilaa iyo 29ka Ogoosto, waxaad heli doontaan Summer EBT. Waxa aad barnaamijyada kale ee manaafacaadka gobolka ku heli karto waa adiga oo soo garaaca 211 ama booqo access.wi.gov.

Waxaan manaafacaadka u soo direynaa qoysaska xaq u yeesha inta lagu jiro bilaha xagaaga markaan ka helno macluumaadkooda. Haddii aad dhawaan guriga ka guurtay, cusbooneysi cinwaankaaga adigoo booqanaya SummerEBT.wi.gov/s/SummerBenefitInfo.

Sidee bay qoyskeygu u heli karaan manaafacaadka?

Haddii ilmahaagu xaq u yeeshaan Summer EBT oo aad markii hore haysatay kaarka QUEST ama kaarka P-EBT ee markii uu xanuunku faafayey, kaarkaas ayaad ku heleysaa. Haddii aadan kaarkaas haysan, waxaad boostada ku heleysaa kaar cusub oo ah QUEST.

Maxaa dhacaya haddii aysan qoyskeygu helin Summer EBT ilaa Juun anagoo fileynay in aan helno?

Haddii aad manaafacaadka heli weydaan ilaa bisha Juun, waxaa laga yaabaa inaan lagaa helin macluumaadka saxda ah oo buuxa si loo eego in ilmahaagu heli karo Summer EBT. Si aan u helno macluumaadka oo dhan, waa in aad soo buuxiso Codsiga Summer EBT. Waxaad codsiga Summer EBT ka heli kartaa barta SummerEBT.wi.gov/s/SummerEBTApp.

Qoysasku ma sii isticmaali karaan manaafacaadka kale ee kaarka cuntada iyagoo haysta Summer EBT?

Haa! Haddii ilmahaagu qaataan Summer EBT waxay ku sii jiri karaan barnaamijyada kale ee sida Summer Food Service Program (Barnaamijka Adeegga Cuntada Xagaaga) ama Seamless Summer Option (Habka Xagaaga ee Fudud).

Faahfaahin Raadso

Sawiro calaamadda QR ama booqo barta dhs.wi.gov/forwardhealth/summerebt.htm si aad u hesho faahfaahinta Summer EBT.

